Golaha Wakiilada JSL

Waaxda Hadal Qoraalka

Opened: - 10:39 AM **Hansard No.22/6** **Kal-fadhiga 22aad**

Fadhiyadii 14aad ***09/09/2013***

Warbixinnta Xeerka Takaaliifta Horumarinta Wadooyinka ee Wasiirka Madaxtooyada iyo Su'aalihii Mudanayashu weydiiyeen

Md. Xirsi X. Cali Xasan:- Dhamaan Shirgudoonka, Mudanayaasha Sharafta leh iyo Marti sharafta kale waxaan idinku salamayaa Salaanta Islaamka, manta waxaan marlabaad idiinku imi inaan sharaxo sida Gudoomiyuhu sheegay Xeerka Horumarinta Wadooyinka oo ay Xukuumadu soo gudbisey, Mudanayaal sida ka warhaysaan Xeerarka processka sharci ee ay soo maraan waa in Xukuumadu soo gudbiso oo soo diraasadeyso kana soo shaqeyso iyadoo ka turjumeysa baahida qaranka una soo gudbiso Golaha Wakiilada, sidaana Golaha Guurtida ugu sii gudba ilaa Madaxweynuhu ka saxiixo, sidoo kale Mudanayaasha Goluhuna unki karaan.

Xukuumadau iyadoo ka turjumeysa Baahida Qaranka waxay soo diyaarisay Xeerkan Horumarinta Wadooyinka, Xeerarka Baahi baa keenta baahida noocaas ahna xukuumadu way soo diyaarisaa oo ka doodaa oo Golaha Xukuumadaa ka dooda, ka dibna idiin soo gudbiysa, halkana aan warbixina idinka siinaa, wixii su'aalo aad qabtaana naga waydiisaan oo aanu ka jawaabaynaa.

Xildhibaano ahaan waxaan idiin soo gudbinay aragtidayadi waxaad xaq u leedihiin inaad wax ka badashaan, wax ku dartaan ama diidaan, anagu waxaanu diin soo gudbinay arragtidayadii oo ku salaysan Muhiidamada ay wadooyinku qaranka u leeyihiin, waxaynu leenahay road network ama wadooyinka isku xidha dalka, marka laga tago inta cusub ee isla gaashadeen Xukuumada iyo bulshadu ee lagu daray dilana xaga shishe ka xigta waxay ahayd 770 km, Dila ilaa iyo Xadka Laascaanood ka shisheeya, Laamiga inta dheheran ayaynu lahayn wax Waddo laami ah, may badnayn ama aad bay u yarayd wax laamiya oo aynu sameysanay oo ka horeeyay Xukuumada Cusub ee Madaxweyne Axmed Maxamuud Siilaanyo Hoogaaminayo, waxaynu ku hawlanayn in la buux-buuxiyo laamiga intaa dhereran.

Waxaa sidoo kale jira wadooyin isku xidha magaalooyinka waaweyn oo aan laamiyo ahayn, iyaga laftigooduna inooga baahan inaynu dayactirno lana horumariyo, waxaynu leenahay oo kale wadooyin isku xidha miyiyada beeraha iyo tuullooyinka, baahiyaha noocaasee jira ayaa keenay in la sameeyo Xeerkan Horumarinta Waddooyinka iyadoo laga duulayo in wixii wadooyin ah ee inoo jirey la dayac tiro, wixii waddooyin cusubna ee la sameyn karona la sameeyo.

Waddooyinku waxay halbawle u yihiin amaanka Qaranka iyo isku xidhka xidhiidhka Bulshada, waxay halbowle u yihiin dhaqaalaha iyo kobociisa oo hadaan waddo jirin baayac mushtari soconayaa uu yar yahay, waxay halbowle yihiin Guud ahaanba dalka, sida darted baa loogu daray Xukuumadu 5 years plankii ay diyaarisay, iyadoo taa laga duulayana waxaanu diyaarinay Xeerkan.

maadaama aanu nidhi Xeerkan qaabkaas ayaanu u diyaarinay wuxuu ku wajahanyahay dhaqaale loo helo baahidaa jirta ee Waddooyinka, dhaqaale aynu helijirney inaynu ka helno waxa la yidhaahdo shidaalka ama liisanka buuga wax yar laga qaado ayuu ku koobnaa dhaqaalaha aynu helnaa, dhaqaalahi wuxuu ku bilawday xiligii hay'ada EUdu inoo yimaadeen ee ay sameynaysay waddooyinka ayaa waxay inaga dalbadeen inay inoo sameynayso Waddooyinka laakiin aynu contribution ku darsano, Contributionkas ayaa laga baasgareeyay halkan iyadoo laga duulayo baahidaa, barigaa waxay ino sameeyay badanka biriijyada, markii biriijyadii inoo sameyeen oo waddooyinkii inoo hadhsanyihiin ayaa xukuumadii hore si ay isu fahmi waayeenba waxay joojiyeen dhaqaalihii loogu talagalay horumarinta waddooyinka, markaa wixii dayactir ah waxaa ugu dambeysay 2006kii.

May jirin muddadaa 9ka sanadooda ah 2 milyan ee trust fundka ugu jirta Somaliland waxaan ahayn, waxay runtii noqotey laga maarmaan in la helo dhaqaale mar hadii wadooyinku halbowle yihiin, dhaqaale yar intii aanay xukuumadani iman ka-kabka wadooyinkii hore inoogu jirey oo qualitygiisu yaryarhaya.

Iyadoo sidaasa, hay'adda waddooyinka oo ka koobneyd saddeda qeybood, Gudidd rosef la odhan jirey, Xafiiska Mamulka oo SRA la odhan jirey iyo iyo Xafiiska Dhaqaalaha oo isagna la odhan jirey Somaliland Road Fund Administration (SRFA), oo ahayd qorshuhu inay hogaamiyaan Gudidda noocaas ah ee boardka ayay qoraal u soo gudbiyeen madaxweynaha, kaas oo ay ku sheegayaan in qaabka ay u dhisantahay hay'addu iyo qorshaha maamul ee u yaala ee ay madaxa ka tahay ayna u arkayn inuu Qaranka dhaqayo, waa aragtida ay soo gudbiyeen Gudoomiyaha Gudiddu, Maamulkiisu waa mid

kooban oo ansixiya wixii loo keeno ee la soo daraasadeeyo, maamulkooduna 100% aanan ku filnayn qaabka ay u asaasnaayeen maamul ahaan oo Xeer Madaxweyne ahaa.

Si sidaas la mida ayuu madaxweynuhu u yeedhay wasiirkii line ministeryga la ahaa ee Wasiirka Hawlaha Guud, Wasiirku wuxuu isaguna soo jeediyay talo taas la mida, oo uu leeyahay sidatan kuma socon karto qoraalna ugu soo gudbiyay madaxweynaha, Madaxwenuhu isagoo ka duulaya talooyinkii ciddii gacanta ku haysay ayuu la tashaday injineeradii iyo dadkii gacanta kuhayay, waxaa dhici jirtey madaama ay ku koobnayd hawshaa iska kooban, dhaqaalaha la helaana uu wax aad u yaraa una qorsheysnaa dhaqaalaha la helaa, sidii maalintii EUdu ka shaqenaysay uu u yaalay oo shaqaalaha Xafiiska ka shaqeeyaa ka duwanaayeen shaqaalah kale ee dawlada, iyadoo aanay jirin dhaqaale meelkale aana ahayn inta yare ee Miisaaniyada ah, Shaqaalihiisuna ay u dhisnaayeen sida shaqaalaha Hay'addaha Xuquuq ahaan, balse wax shaqo ah oo ay fulin karaan aanay jirin, wax qalab oo dhexyaalay may jirin.

Sidaa darted, madaxweynuhu isagoo ka duulaya talooyinkii ay soo jeediyeen dadki aqoonta u lahaa iyo baahida Waddoyinka uu qabo qaranku, ayuu soo saaray Xeer Madaxweyne oo uu hay'addii dib ugu qorsheynayo laba jeer buuna soo kala saaray, ugu dambeyn hay'addii waxaa laga dhigay mid hoos timaada Madaxtooyada gaara ahaan Wasaarada madaxtooyada oo u adeegta Bulshada shaqaaleheeduna uu si toosa uga mid noqdo shaqaalaha dawlada oo hay'adda shaqaalaha loo gudbiyay.

Waxaa kaloo jirtey in political willkii madaxweynaha ee rabitaanka wanaagsan ee dawladiisu la timi madaxweynaha ee abaabulka iyo horumarka ahaa inay abaabuleen iyagood dalwada kaashanaya bulsho kala duwan ee reer Somaliland ah oo ay waddooyinkii u dhaqaaqeen ninba taagtii inta uu ururinkarayo, arrinta noocaas ah xukuumadu waxay ku khasbanayd inay garab gasho dedaalka bulshadeeda oo fundka ay ururiyeen maahee dhaqaale kale loo helo, waxaa socdeyna waddooyin aad u badan oo Bulshada iyo Xukuumadu waxay waddo ah, waxaa soconayay waddada dheer ee dilaa ilaa Boorama oo xukuumadu iyadoo baahidaa laga duulayo 100kii cisho ee ugu horeysay lagu daray priorityga, lagu daray 4 km, sidoo kale bulshadu markay aragtey rabitaankii iyo dareenkii dawlada ee in wax la sameeyo ayay is abaabuleen wax badan la yimaadeen aad baana ugu mahadnaqayaa dadka reer Boorame gudo iyo dibadba joogta.

Waxaa kale oo jirtey oo iyana la bilaabay waddada Burco iyo Oodweyne isku xidha oo la bilaabay, wadda Hargeysa iyo Salaxley oo la bilaabay iyo Waddada isku xidha Wajaale iyo Kala-baydh, sidoo kale wada Ceergaabo iyo Maydh isku xidha ee Tabca, waddooyin badan baa la bilaabay, Waddooyinkaas oo dhan waxay ahaayeen kuwo bulshada dedaalkooda iyo rabitaankii xukuumadu ay bilaabeen, sidoo kale xukuumada waxaa looga baahnaa dhaqaale Wadooyinka lagu bixiyo, waxaa imanaysay markaa iska dul tag shaqo oo hay'addi waddooyinka oo markaa halkaa joogtey iyo Madaxweynihii Qaranka degaan walba isagoo is abaabulay u imanayay, markaa ayaa dedaalkii la mideeyay oo la isugu keenay Madaxtooyada, oo uu madaxweynuhu u gartey.

Markii Madaxtooyada la hooskeenay waxaanu bilawnay dedaal isugu jira dhaqaale, isugu jira qorshe maamul iyo plan oo la qorsheeyo qaabkii waddooyinka loo sameyn lahaa, waxaa ka mid ahaa runtii in sidoo kale xafiiskii la habeeyo oo maamulkiisii la dhiso, waxaa ka shaqeyn jirey Xafiiska markaan la wareegnay dhowr iyo afartan oo ku jiraan 9 injineer, maadaama aanu qalab oolin ha la gaadho marka la helee inaanu shaqaalihii isugu soo ururinay inaanay 23 oo injineeradu aanay ka badan 3, intii kale waxay ahayd dhiigbax dulsaaran qaranka iyo culeys dulsaaran oo aan baahi loo qabin, angoo taa ka duuleyna waxaanu u gudbinay hay'ada shaqaalah inay imtixaan ka qaado oo wixii ka gudba shaqaale dawladeed noqdaan, wixii kalena tababaro loo diro.

Taa mid la mida, waxaanu daraasadeynay madaaama hay'adu nidhi way gacmo la'dahay, waadooyinkaasina jiraan, inaanu sameyno halbeeg waxa ku bixi kara waddo kasta, hadii lacag la ina siiyo maxaynu ku qabsan karnaa inagoo ka duuleyna kilometerka la sameyno, waxaanu tijaabinay ficlan inay ku baxaan inta aynu tijaabnay 70-100 kun oo dollar iyadoo duruufta la eegayo inaanay inaga badan, sidoo kale dhaqaale raadintii oo Xeerkani asaas u yahay budgetkii hore ee aad ansixiseen wax loogu daro oo aan codsano, sidoo kale sidaa aan maalintii dhoweyd halkan ka xusney dedaalka aanu galinay ha'adihii in laga helo oo 2dii milyan ee aan xusey ka helnay, budgetkii lacag 230 inay ahayd aan u malaynayo aanu ugu soo darno, iminkana markaanu aragnay baahida loo qabo inay aad u balaadhantahay aanu xeerkan idiin soo gudbinay.

Kumaanu deyn intaa, ee hay'adda dhismaheedii si aanu u dhameystirno waxaanu gacanta ku haynaa qorshe balaadha oo dalka oo dhan Waddooyinkiisa daraasadiisii iyo horumarintiisii ah oo kala horeyn doona, oo ka mid tahay Wadda Ceergaabo oo Madaxweynuhu sanadkii hore halkan ka balanqaaday halbowlena Qaranka u ah iskuna xidha badka Somaliland

dhulbadhihiisii, marka la eego dalka badh ka go'anyahay oo maqan, sidoo kale wadda boorame ee aan soo sheegay oo 2dii km ee du dambeeyay lagu jiro oo laamigii la saarayo, waxa ka shisheeya marka laga tago boorame waddii saylac oo ka mid ah kastamada dhaqaaluhu ka soo galo dalka Dalka Jabuuti oo dhaqaale ahaan iyo siyaasi aahaan xidhiidh inaga dhaxeeyo.

Si lamida sidaa waxaanu gacanta ku haynaa oo 5tii km ee u horeeyay xadhiga ka jarnay, 5tii km ee xigeyna ku jirnaa wadda isku xidha kala-baydh iyo wajaale oo iyana dalka aynu jaarka nahay ee Itoobiya inagu xidhaysa oo noqoneysa berbera ilaa addisaba isku xidhkeeda waxaa ka hadhay 18 km ee socota, baahida noocaas iyadoo ayna horyaalaan ayaanu xeerkan deraasadiisa ku keenay.

Intaas oo kaliya maanu sameyn, madaama aan soo tilmaamay dhismaha hay'adda oo ah xagii maamulka iyo shaqaalah, xaga expenditureka waxaa loo baahday inaanu diyaarino Xeer Asaas u ah Hay'ada oo draft insha'alah aan kala-fadhigan ama kan ku xiga idiin keeni doono, waa Xeerkii lagu asaasayay Hay'adda oo mid madaxbanaan ku noqon lahayd.

Inta aan Xeerka u galin waxaan jecelahay inaan tilmaam ka bixiyo Waddooyinka Gaadiidka mara si aad u aragtaan xadiga gaadiidka dalka inta mara, laakiin waxaan targetgareeyay waliba inta laamiga ah.

Hargeysa—Berbera –Hargeysa:- waxaa mara maalintii 1563 gaadhi oo isugu jira noocyada Baabuurta, baabuurta noocaas ah ee berbera iyo hargeysa inta u dhaxaysa, Gawaadhida Yar 1131, Landcruserka iyo wixii la mida 1331 , Busaska yar 325, light Good vehicle349, kuwa meel dhexaadka 735 iyo 14 tareelaha, marka laba dacal kuwa ka imanaya la xisaabiyo.

Hareysa-Gabiley-Hargeysa:- oo ah kalabeydh ilaa wajaale kuwa qabanaya iyo kuwa ka imana waxaa mara 1295 gaadhi maalintii, kala-baydh-Boorame ama Hargeysa-Boorame 253 Gaadhi maalintii.

Berbera-Burco-Berbera:- waxaa mara 780 gaadhi maalintii, oo iyagu u kala qaybsama 500 oo gawaadhida yar, laangurasara iyo wixii la mida 401, Mini-buska 58 gaadhi, light good vehicle 151, midium goods vehicle 449, heavy weight goods vehicleka 200 oo gaadhi ayaa mara maalintii.

Burco-Laascaanood-Burco:- waxaa mara maalintii 380 gaadhi maalintii, oo u kala qaybsama gawaadhida yar 361, laangurasara iyo wixii la mida 496, Mini-

buska 79 gaadhi, light good vehicle 158, midium goods vehicle 679 , heavy weight goods vehicleka 140 gaadhi ayaa mara maalintii.

Cawad Cali Maxamed	**C/risaaq Siciid Ayaanle**
Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada	**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**
---	---